



Atrioventricular Septal Defect (AVSD) Complete

Duleelka Darbiyada Wadnaha ama AVSD Buuxda



Ogeysiis:

The Children's Heart Clinic 2530 Chicago Avenue S, Ste 500, Minneapolis, MN 55404
612-813-8800 * Toll Free: 1-800-938-0301 * Fax: 612-813-8825
Children's Hospital of Minnesota, 2525 Chicago Avenue S, Minneapolis, MN 55404

Duleelka Darbiyada Wadnaha ama AVSD Buuxda

Atrioventricular Septal Defect (AVSD) - Complete

Duleelka darbiyada wadnaha (oo loo soo gaabiyo kanaalka AV) waxaa sabab u ah marka ay jiraan cillado wadne oo aan caadi ahayn oo lagu dhasho. Waxa ay ka kooban tahay waa duleelka darbiyada wadnaha iyo daboolka AV (daboollada saddexda iyo halka liifad). Kanaalka AV waxaa loo kala saari karaa mid dhammeystiran, qeyb, ama mid meel dhexaad ah.

Noocyada:

- **Dhammeystiran:** Cilladda Duleelka Darbiga Wadnaha (ASD) Dhanka Hoose iyo Duleelka Darbiga Wadnaha (VSD) ayaa jira. Dildillaaca (kala-go'id) ah daboolka hal iyo saddex liifadood ayaa caadi u ah, dabool weyn oo ah AV oo wuxuu isku xirayaa qalbacyada kore iyo hoose ee wadnaha. Waxaa la arkaa 2 ilaa 3% oo gebi ahaan waa cillado wadne oo lagu dhasho. Carruurta qabta kanaalka AV ee dhammeystiran, 70% ayaa ah Dad Kala-Dhiman (21 Hiddeside).
 - **Kanaalka AV dheellitiran** waxa loola jeedaa booska dhexe ee daboolka AV ee ka sarreeya labada qalbac ee wadnaha.
 - **Kanaalka AV ee aan dheellitirneyn** wuxuu dhacaa marka duleelka daboolka AV uu jiro qalbacyada wadnaha ee bidix ama midig. Aan-sameysmin (weli-dhammeysmin) hal qalbac ayaa la arki karaa, oo waxay keentay baahi ah shaqeynta hal qalbac (eeg qalliin loo sameeyo ququlka dhiigga Fududeynta Blalock-Taussig Shunt, Glenn Laba-geesood ah, iyo Fududeynta Fontan).
- **Qeyb:** Waxa kale oo la yiraahdaa kanaalka AV "aan-dhammeystirneyn". ASD Dhanka hoose oo ku kala duwan daboolka hal iyo saddex liifadood iyo dillaacyada daboolka hal iyo saddex liifadood. Badanaa waxaa jira qeyb ka mid ah halka dabool (daboolka bidix ee AV) oo aan isku filneyn. Kanaalka qeybta AV waxaa la arkaa 1 ilaa 2% oo gebi ahaan waa cillado wadne oo lagu dhasho.
- **Meel-dhexaad:** ASD Dhanka hoose, oo ay qeyb kala qeybsan yihiin daboolka AV. VSD yar ama dhexdhexaad ah (badanaa dhowr) ayaa la arki karaa in ay sababaan qeybo cirriir ah.

Wiisiteynta/Calaamadaha Jirka:

- **Kanaalka AV dhammeystiran:** Calaamadaha lagu garto wadnaha aan dhiigga soo saari karin (garaacis ah degdeg, neefsasho ah degdeg, korriin/cunto xumo). Guuxa wadnaha ee dhankiisa bidixda ayaa noqonaya heerar kala duwan oo waxa uu uga sii gudbi karaa dhabarka.
- **Qeyb/Meel-dhexaad:** Badanaa waa calaamad la'aan, markuusan ku filneyn muruqa liifadda ah. Markuusan ku filneyn muruqa liifadda ah, guux ayaa laga maqli karaa wadnaha ee dhankiisa bidixda oo ilmuhu waxa uu yeelan karaa calaamadaha wadnaha aan dhiigga soo saareyn.

Cilladsheegid:

- **EKG:** Wadnaha xanniban heerka koowaad (inta u dhaxeysa garaacista PR oo dheeraata) iyo dheellitir la'aan ah laba qalbac ayaa jiri karta.
- **Raajada xabadka:** Weynaanta wadnaha iyo xididdada wadnaha iyo halbowlaha sambabbada. Marinka dhiigga qalbac bidix ayaa dheeraanaya oo dhuudhuubanaya, badanaa waxa sababa muuqaal ah "isku-laabnaanta".
- **Uultarasawanka wadnaha:** Cilladsheegid.

Maareynta/Daaweynta Caafimaadka:

- Daawooyinka biyaha saara (nooca wadnaha) iyo daawo kale oo culeyska yareysa (enalapril, captopril) ayaa ah waxa lagu maareyn karo calaamadaha.
- Waxqabad qalliin ah in la sameeyo ayaa ah lama-huraan (eeg hagaajinta AVSD).
- La-socoshada wadnaha ayaa khasab ah si loo qiimeeyo shaqada iyo awoodda daboolka AV.

Natiijooyinka Mustaqbalka-Fog:

- Cimriga waxa uu xiran yahay nooca xanuunka iyo/ama xanuunnada kale ee ilmuhu qabo.
- Infakshanka bakteeriyada prophylaxis oo ah 6 bilood ka dib muddo dheer haddii uu jiro dareere ka socda daboolka ama qalabka daboolka ah ee loo geliyo.